# Badbaadada gaadiidka loogu talogalay waalidiinta dhallinyarta



Kala hadal ilmahaaga badbaadada gaadiidka

NTF
Baabuur nabad ah

www.ntf.se

# Horyaalada adduunka iyo ku waaritaanka?

**Awoodda maaraynta gaadiidku waxay ku xidhan tahay arrimo badan. Da'yartu wali may yeelan garashada iyo caqliga looga baahna inay ku maareeyaan dhammaan xaaladaha ku iman kara gaadiidka – hadal iyo dhammaan, waa isticmaalayaal waddo oo aan waayo-aragnimo lahayn. Dhallinyartu waa inay si tartiib-tartiib ah u bartaan sida looga qaalib noqonayo tooda si ay u kordhiyaan awoodda ay u leeyihiin inay qaataan go'aano caqli badan.**

Waalid ahaan, waxaad ka ciyaartaa door muhiim ah koboca ilmahaaga iyo sida ay gaadiidka u fuulaan. Dhallinyartu uma diyaarsana xagga awoodda inay gartaan cawaaqibyada ficilladooda. Isla markaana, dabeecado iyo habdhaqano badan oo waarayaa waxay samaysmaan sannaddada dhallinyarnimada. Maskaxdu si aayar ah ayey u qaandhaa. Qaybta hore (ee maskaxda), oo ah halka awoodda garashada ciwaaqibyadu ku yaalaan, ma qaangaadho ilaa qiyaastii 25 jirka. Taasi oo ah sababta dhallinyartu sida badan ay qiyaasta ka badbaadinta ah uga qaataan awoodahooga.

Da'yartu sida badan waxay u dhaqmaan si bilaa feker ah, waxayna u falcelyaan si xamaasadaysan oo aan caqli ku dhisnayn, taasi oo horseedi karta khatar-u-badheedh xad-dhaaf ah. Ahaanshaha waddo-isticmaale badbaado leh waxay keentaa qiimayna halisaha iyo u muujinta tixgalin dadka kale. Waxa muhiim ah in aasaaska loo dhigo nooca fekerka ee sare u qaadaya badbaadada gaadiidka. Ka hadal halisaha jira. Ka hadal cawaaqibyada habdhaqanada kala duwan ay keeni karaan.

**Bogaggan, NTF waxay ku soo koobtay macluumaad iyo talo loogu talogalay waalidiinta dhallinyarta kuwaasi oo wata gaadiid ay iska leeyihiin.**




298:-

# Da'yarta iyo baaskiiladaha

**Marka ay gaadhaan dhallinyar, carruurtu sida caadiga ah waxay dhex kaxaystaan baaskiiladda gaadiidka dhexdiisa muddo dhawr sano ah. Haddana wali waa xaalad u baahnaan kartaa wada-hadal badan oo dhexmara waalidka iyo ilmaha.**

Xidhashada koofiyadda badbaadadu ilaa 15 jirka waa sharci, laakiin waa wax inta badan dhaca in da'yartu ayna xidhan koofiyadahan xiitaa marka hore. Da'yartu waxay xisaabsan yihiin xaddi badan dhaawacyada baaskiiladaha ee halista ah, waxaana ugu wacnaan karta waalidiin badan oo illaawa inay ka fekeraan sida iyo halka carruurtoodu ay tahay inay ku kaxeeyaan. Taasina waa sababta ay muhiim u tahay inaanad faraha ka qaadin arrinka baaskiilad-kaxaysiga badbaadada leh, iyo inaad sii waddo noqoshada tusaale fiican adiga laftaadu – adiga oo noqonaya baaskiilad-kaxayste badbaadada dhawra.

## Waxyaalaha ay tahay in la xasuusnaado

- Kaxaysiga baaskiilad waa mid u fiican caafimaadkaaa iyo bey'adda labadaba. Caadaysiga qofka ee la abuuro inta la da'yar yahay sida badan way sii socotaa inta qofku nool yahay.
- Sharciga koofiyadda baaskiiladdu waa caawimo loogu talogalay waalidiin badan, laakiin wali waxa muhiim ah in la ilaaliyo maskaxda dhallinta ka wayn 15 jir.
- Taayirrada kuuskuuska leh ee baaskiiladdu waxay sahlaan in qofka wataa uu sii wato wadashada inta lagu jiro bilaha jiilaalka sidoo kale.
- Baaskiiladda waxa loo tixgaliyaa inay tahay gaadiid waddo, taasi oo ka dhigan in baaskiilad-watuhu ay tahay inuu ku dhaqmo xeerarka gaadiidka, oo ay kujirto waajibka inuu ahmiyad siiyo oo uu joogsado iyo inaanu kaxaysan baaskiiladda jid qaldan jidadka dhinaca kaliya loo socdo.
- Sharcigu wuxuu farayaa baaskiilad-wadaha inuu isticmaalo ilaysyada baaskiiladda marka uu socdo madowga.

# Da’yarta iyo mootooyinka

**Da’da ugu yar ee la oggol yahay kaxaysiga mootadu waa 15. Tirakoob ayaa muujiyey in da’yarta ilaa 15 jirka ah ay kujiraan kooxda shilka u nugul, tirakoobkanna sida badan wuxuu waafaqaa wakhtiga da’yartu ay helaan mooto ayna dibadda ula baxaan oo la dhexgalaan gaadiidka iyagoo wata gaadiid mishiin leh markii u horraysay. 2009, sharci ayaa la ansixiyey dhigaya in tabobar khasab ah lagu siiyo xarun  tabobar oo la aqoonsan yahay si awood loogu siiyo inay kaxaystaan mooto. Hubi in ilmahaagu helo waxbarasho wadis oo fiican, oo ay kujiraan qaybaha fikradda ah iyo qaybaha wadista tooska ah.**

Laga bilaabo Janaayo, waxa la mamnuucay in lagu wado mootada darajada I xawaare ka badan 45 km/saacadda. Mootooyinka wakhtigan ee Midowga Yurub waxa si sahlan awood loogu siin karaa inay gaadhaan xawaare gaadhaya ilaa 60-80 km/saacadda. Laakiin biriigyada, taayirrada iyo qolfoofka looguma talogalin xawaarahan sare. Marka xawaaruhu sii batoba, waxa sii badata halisnimada dhaawaca iyo shilka – mootooyinka awoodda xagga injiinka la siiyo waxay ku lug leeyihiin kala-badh dhammaan shilalka dilaaga ah ee ku lugta leh mootooyinka.

Haddii aad gadato mooto la isticmaalay oo aad rabto inaad ogaato in injiinka la xoojiyey, waxa jira gadayaal mooto oo badan kuwaasi oo bixiya hubino xagga badbaadada ee mootooyinka la isticmaalay.

Sharciga ayaa ka dhiga qasab in la xidho koofiyadda marka wadista mootada. Koofiyaddu waa waxa ugu muhiimsan, iyo runtii ta kaliya, qalabka badbaadada qofka ee wada-yaasha mootadu haystaan. Koofiyaddu waa in si fiican loo fadhiiyo lana xidho. Haddii ay dabacsan tahay, way dhici doontaa waxayna noqon wax bilaa faa’ido ah marka shilka. Xasuusnawo in sharciga koofiyaddu sidoo kale khuseeyo rakaabka lagu qaadayo mootada. Haddii aad koofiyadda si sax ah u isticmaasho, waxaad haysataa fursad macquul ah inaad badbaado shil xawaarayaasha aan ka badnayn 45 km/saacadda. Hadda bal sawiro waxa dhici lahaa haddii aad fuushan tahay mooto ku socota 70 km/saacadda adiga oo bilaa koofiyad ah!

Xeerarka kale ee ay tahay in la xasuusnaado waa in mootadu ay tahay mid caymis leh, taasi oo ah waxa mamnuuc ah in la kaxeeyo adiga oo dhiiggaagu leeyahay khamro ama daroogo, taasi oo ah waxa mamnuuc ah inaad kaxayso mootooyinka dhabbooyinka cagta, iyo in ay tahay in dhammaan qawaaniinta kale ee gaadiidka lagu dhaqmo.

**Mootooyinka waxa loo kala qaadaa laba darajo, darajada I iyo darajada II.**



## Mootada darajada I

- Waa inay diiwaangashan tahay waana inay leedahay lambarka shatiga.
- Xawaaraha ugu badan 45 km/saacadda.
- Waxa laga yaaba inaan la wadi karin dhabbooyinka baaskiiladda.
- Shariga wadista AM-class ayaa loo baahan yahay ugu yaraan.
- Hal qof kaliya ayaa lagu qaadi karaa mootada, haddii aanu jirin kursi loogu talogalay oo diiwaangashan.

## Mootada darajada II

- Qasab ma aha in la diiwangaliyo.
- Xawaaraha ugu badan 25 km/saacadda.
- Waxa laga yaabaa in la wadi karo dhabbooyinka baaskiiladda, marka laga reebo dhabbooyinka ay ku calaamadsan tahay “Mooto lama oggola”.
- ‘Förarbevis,’ nooc ruqsad ah, ayaa loo baahan yahay.
- Waxa la oggol yahay in rakaab lagu qaado mootada darajada II haddii uu jiro kursi loogu talogalay rakaabka, haddii kale xeerar la mid ah kuwa khuseeya marka rakaab lagu qaadayo baaskiilad ayaa khuseeya.

## Waxyaalaha ay tahay in la xasuusnaado

- Waa sharci darro in quwadda injiinka la kordhiyo mooto. Waa adiga masuuliyaddaada inaad hubiso in sharcigan lagu dhaqmo waalid ahaan. Waxa lagugu xukumi karaa inaad bixiso ganaax inaad oggolaatay wadis sharci darro ah haddii aad u oggolaato ilmahaagu inuu kaxeeyo mooto injiinka la xoojiyey.
- Kaxee oo tijaabi mootada si aad u hubiso inaan la xoojin injiinka.
- Gadayaasha iyo geeraashyadu waxa laga yaabaa inay ka fogaadaan dammaanadda haddii mootada injiinka la xoojiyey.
- Shirkadaha caymisku waxa laga yaabaa inay diidaan inay bixiyaan lacagta caymiska mootooyinka injiinka la xoojiyey ee waxyeelo soo gaadhay.
- Ilmahaaga waxa dhici karta in shatiga laga hakiyo haddii mootada injiinka la xoojiyey.
- Bilaysku waxa laga yaabaa inuu la wareego mootada la injiinka la xoojiyey.
- Kaxaynta mootada injiinka la xoojiyey waxa laga yaabaa inay horseeddo dhibaatooyin u-qalmidda ruqadda bartaha mustaqbalka.



**Calaamada “gaadiid qunyar socda” waa in lagu dhajiyaa xagga dambe ee A-tractor.**

# A-tractor

**"A-tractor" waa baabuur loo rogay cagaf taasi oo xawaareheega u badan uu ku xaddidan yahay 30 km/saacadda. A-tractor waxa laga yaabaa inay leeyaday kuraas rakaab hal ama laba, laakiin dadka ama alaabta midna waxa laga yaabaa inaan lagu qaadi karin huudhiga ka dambeeya kuraasta hore.**

Shatiga kaxaynta gaadiidka darajada uu doono ha noqdee ama shatiga cagafta u gaarka ah ayaa loo baahan yahay si aad u kaxayso A-tractor. Shatiga cagaftu wuxuu xaq u siinayaa qofka haysta inuu kaxeeyo cagafta loogu talogalay xawaaraha ugu badan ee 40 km/saacadda, ama qalabka injiinka leh ee darajada II oo leh xawaaraha ugu badna ee 30 km/saacadda.

Injiinada la xoojiyey sidoo kale waa dhibaato A-tractor-ka. Daraasaday samaysay NTF ayaa muujisay in wax ka badan kala-badh dadka kaxeeya A-tractor ay leeyihiin gaadiid awoodda inuu ku socdo xawaaraha ugu badan oo ka sarreeya 80 km/saacadda.

**Waxa soo socda ayaa loo baahan yahay si aad u hesho shatiga cagafta:**

1. *Inaad leedahay ruqsadda bartaha wadista oo shaqaynaya.*
2. *Inaad gaadhay 16 jir.*
3. *Inaad gudubtay imtixaan qoraal ah.*

Shatiga A-tractor sidoo kale wuxuu xaq u siiyaa qofka haysta inuu kaxeeyo mootooyinka darajada I iyo darajada II. Sidoo kale waxa laga yabaa inaad kaxayso A-tractor haddii aad leedahay shatiga AM-class. Waxa suurogal ah inaad u qalanto shatiga AM-class laga bilaabo 15 jirka. Shatigan sidoo kale wuxuu u oggolaadaa qofka haysta inuu kaxeeyo cagaf da' ka horraysa haddii uu dalban lahaa shatiga cagafta.

Laga bilaabo 2017, A-tractors waxa sidoo kale lagu soo rogayaa baadhis. Haddii aad leedahay, A-tractor, waa inaad ogaato marka gaadiidkaaga ay joogto in la baadho.

---

## Waxyaalaha ay tahay in la xasuusnaado

- Tijaabo oo kaxee gaadiidka si aad u hubiso inaan la xoojin injiinka.
- Marnaba cid ha ku caawin xoojinta injiinka cagafta.
- Kaxaynta A-tractor injiinka la xoojiyey waxay horseedi kartaa dhibaatooyin u-qalmidda ruqsadda bartaha mustaqbalka.
- Haddii gaadiidka injiinka la xoojiyey, waa adiga waalid ahana iyo mulkiilaha gaadiidka cidda ka masuulka ah. Ilmahaaga waxa lagu dacwayn karaa baabuur-kaxayn aan sharci ahayn, si la mid ah isagoo kaxeeyey baabuur bilaa shati.

# Jidka loo marayo shatiga wadista

**Si aad u hesho shatiga wadista, ruqsadda bartaha wadista oo laga soo qaato Hay'adda Gaadiidka Swedish ayaa loo baahan yahay. Ruqsaddan waxay shaqaysaa shan sano. Shatiga wadista darajada B wuxuu xaq u siiyaa qofka haysta inuu kaxeeyo baabuurta rakaabka iyo baabuura xammuulka ee fudud oo leh culays aan ka badnayn 3500 kg.**

Si aad u hesho shatiga wadista, dalbaduhu waa inuu yahay 18 jir, yahay deggane rasmi ah ee Sweden oo uu dhammaystay koorso hordhac ah oo tabobar, iyo sidoo kale labada qaybood ee koorsada wacyigalinta halista. Imtixaanka wadistu wuxuu ka kooban yahay qayb fikrad ah iyo qayb wadis oo toos ah; labadan qaybood ayaa loo baahan yahay in la dhammaystiro isla wakhti.

Si aad u noqoto dirawal badbaado, marka laga tago inaad baabuurka si fiican u maamuli karto oo aad raacina karto qawanaaninta gaadiidka, waxaad u baahan tahay inaad awooddo inaad qorshayso safarkaaga, kana war-qabto halisaha iman kara iyo waxyaalaha aad ku xun tahay. Helista waayo-aragnimo waxay ku timaaddaa dabbakhaad, waxa ugu fiicanna waa isku xidho casharrada dugsiga baabuur-wadista iyo casharrada dabbakhaadda gaarka ah. Dhallinyarta waxa loo oggol yahay inay bilaabaan casharrada dabbakhaadda iyada oo uu weheliyo horjooge laga bilaabo 16 jirka. Horjooguhu waa inuu dhammaystiray oo uu gudbay koorso hordhac oo tabobar, waana inuu yahay 24 jir oo uu haystay shati wadis muddo gaadhaysa shan sano ee tobankii sano ee tagay.

## Waxyaalaha ay tahay in la xasuusnaado

- Xaadirista dhammaan hordhaca koorsada tabobarku waxay u dhigtaa aasaas fiican dabbakhidda casharrada wadista.
- Dirawalada da'da yar waayo-aragnimo ma leh. Saacadaha badan ee ay taayirka ka dambeeyaan, waa markasta oo ka sii fiican tahay. Sidaa darteed bilaw casharrada dabbakhaadda sida ugu horraysa uguna tirada badan ee suurogal ah.
- Xasuusnaw in horjooguhu ka masuul yahay muddada kalfadhiyada dabbakhaadda wadista ee gaarka ah, iyo in horjooguhu ka masuul yahay sidoo kale wixii kale ee rakaab ah.


SKALDJUR
FISKAFFAR
DELIKATESSER
14 KöK


60

# Dhallinyarta iyo wadista

**Halisaha shilka** Dirawalada da'da yar aad ayey ugu badan yihiin shilalka gaadiidka qudha, iyo shilalka ay maamuli kari waayaan baabuurka. Xawaarayaal sare iyo waayo-aragnimo la'aan waa laba khatar ah, oo halista dhimashada dirawalada da'da yar in badan ayey ka sarraysa tan dirawalada waayo-araga ah. Qaar badan oo kamid ah kuwa ku dhinta shilalkan ma xidhna suunka kursiga. Kooxda ugu sii liidata waa ragga da'da yar kuwaasi oo dhawaan helay shatiga wadista kuna wada xawaare xad-dhaaf ah.

Halisaha shilalku waxay sarreeyaan galabtii iyo habeenkii, gaar ahaan maalmaha fasaxa toddobaadka. Shilalka la xidhiidha khamrada iyo daroogada ayaa aad ugu badan dirawalada da'yarta ah marka loo eego dirawalada kale; da'yartu sidoo kale aad ayey ugu badan yihiin shilalka daalka la xidhiidha.

Maalmahan waxa jira nidaamyo taageero farsamo oo la heli karo, sida xasuusiyayaasha suunka kuriga, nidaamyada digniinta daalka dirawalka iyo hirgalinta nidaam xawaare, si looga caawiyo horumarinta badbaadada marka go'aanka dirawalku shaqayn waayo. Kuwan waxa ugu caansan xasuusiyayaasha suunka kuriga, kaasi oo sameeya cod soona saara iftiin xasuusinaya dirawalka inuu suunka kuriga xidho. Isku-day inaad doorato baabuur leh nidaamyo taageero oo badan si loo kordhiyo badbaadada gaadiidka.



**Sikhradda iyo gaadiidka** khamrada, daroogada iyo gaadiidku isma galaan. Sidaas oo ay tahay, dad badan ayaa ku dhinta ama si xun ugu dhaawacma baabuur-wadista cid sakhraansan. Saddex meelood hal meel dirawalada sakhraansan waxay u dhexeeyaan 18 iyo 24 jir. Dirawalka daroogaysan ama sakhraansan kuna lug leh shil keenaya dhaawacyo gaadha dadka kale ama u dila si kama' ah cid waxa lagu xukumi karaa ilaa 8 sano xabsi ah.

Waalid ahaan, waxaad u tahay tusaale caruurtaada. Kala hadal cawaaqibyada iman kara una sheeg waxa dhici kara haddii ay baabuur kaxeeyaan iyagoo sikhrad qaba. Ku dhiirigali inay diidaan inuu qaado qof sikhradaysan. Sababto oah dirawalada sakhraansan waa khatar badan yihiin. Waa wax aad loogu dhiirado in la diido in la raaco. Wac bilayska si aad uga hortago cid sakhraansan ina baabuur kaxayso. Arrinku wuxuu taagan yahay badbaadinta nololo, ha noqoto taada ama ta dadka kale. Natiijada ugu fiican marka sakhraan gaadiidka kujiro waa in bilaysku joojin doono. Xaaladda ugu xun, socdaalku waa inuu noqdo kii ugu dambeeyey ee qofka yar.

Qufulka biriitlaysar waa qaab looga hortago wadista cabsan. Si baabuurku u istaadhmo, waa inaad afuufto qaybta afka. Haddii aad khamro cabtay, suurogal kuu noqon mayso inaad istaadho baabuurka. Nidaamkan badbaado wali aad uguma badna baabuurta gaarkka ah.

## Waxyaalaha ay tahay in la xasuusnaado

- Ka feker habdhaqankaaga. Waxaad u noqon kartaa tusaale fiican ilmahaaga dhallinyarta ah adiga oo had iyo jeer xidhanaya suunka kursiga, ku dhaqmaya xadka xawaaraha iyo inaad si fiican u nasato iyo inaad baabuurka kaxayso bilaa sikhrad.
- Sii go'aanso inta ilmahaaga ay ku qaadanayso inuu guriga yimaad marka uu xaflad ka yimaad.
- Had iyo jeer u oggolow ilmahaagu inuu guriga soo waco, xiitaa haddii ay saqbadh tahay.
- Ku boori inuu raaco gaadiidka dadwaynaha.
- La kaayeyso waalidiinta kale inaad carruurta baabuurka ku qaaddaan.
- Sii ilmahaaga lacagta taksiga ama hubi inuu qaato baagga habeen-dhaxa.



# La xidhiidh ururrada aan wada-shaqayno

Blekinge: **blekinge.ntf.se**

Dalarna: **dalarna.ntf.se**

FyrBoDal: **fyrbodal.ntf.se**

Gotland: **gotland.ntf.se**

Gävleborg: **gavleborg.ntf.se**

Halland: **halland.ntf.se**

Jämtland: **jamtland.ntf.se**

Jönköping: **jonkoping.ntf.se**

Kalmar: **kalmar.ntf.se**

Kronoberg: **kronoberg.ntf.se**

Norrbotten: **norrbotten.ntf.se**

Skaraborg: **skaraborg.ntf.se**

Skåne: **skane.ntf.se**

Stockholm: **stockholm.ntf.se**

Sörmland: **sormland.ntf.se**

Uppsala: **uppsala.ntf.se**

Värmland: **varmland.ntf.se**

Väst: **vast.ntf.se**

Västerbotten: **vasterbotten.ntf.se**

Västernorrland: **vasternorrland.ntf.se**

Västmanland: **vastmanland.ntf.se**

Örebro: **orebro.ntf.se**

Östergötland: **ostergotland.ntf.se**

NTF
Baabuur nabad ah